## Tagista maxkamadda

Yeerinta liiska. Maxkamadaha intooda badan koox kiisas ah ayaa isku mar la muddeeyaa. Xaakinku wuxuu yeeriyaa magacyada dhammaan kiisaska liiska ku jira si uu u xaadiriyo, intaas kadibna xaakinku kolba kiis ayuu u shaqeeyaa. Haddii maxkamadda lagu qaadayo Zoom, xaakinku wali wuu yeeriyaa kiisaska wuxuuna u dhagaystaa kiisaska si mid-mid ah.

Dhexdhexaadin. Marka kiiska la yeeriyo, xaakinku waxa laga yaabaa inuu u sheego haddii labada dhinac jeclaan lahaayeen inay arrintooda dhexdhexaadin ku dhammaystaan. (Dhexdhexaadiyayaal maxkamaddu magacowday ayaa diyaar ah maalinta dhagaysiga.) Dhexdhexaadiye waa qof dhinacyada ka caawiya inay kiiskooda xal ka gaaraan. Dhexdhexaadiyuhu dhinacyada lama safto. Adeeggu waa bilaash. Haddaad kiiskiina dhexdhexaadin ku dhammaysataan, heshiiska aad gaartaan waxa loo dhiibaa xaakinka si uu u hubiyo inuu macquul yahay. Haddii kiiska heshiis looga gaari waayo dhexdhexaadinta, xaakinka ayaa kiiska dhagaysta.

Dhagaysiga. Labada dhinacba waxay hor yimaadaan xaakinka. Xaakinku wuxuu waydiiyaa dhibbanaha bal inuu sheego sababta uu halkan u joogo iyo waxa uu ka cabanayo. Markaa kadib waa marka eedaysanuhu ay tahay inuu sharraxo sabab kasta oo dhibbanuhu inuu sax yahay burinaysa. Labada dhinacba waxay muujin karaan sawirro ama dokumentiyo sida jeegag la joojiyey ama waraaqo mushahar, markhaatiyada ayaana maragga furi kara.

Go'aanka. Dhagaysiga kadib, xaakinku wuxuu go'aamiyaa cidda guulaysatay kiiska. Xaakinku wuxuu ku dhawaaqi karaa go'aanka isla marka dhagaysigu dhammaadaba ama go'aanka mar dambe ayuu soo diri karaa, kadib markuu darso caddaymaha ama sameeyo cilmibaaris sharci. Go'aanka xaakinka waxa loogu yeeraa "go'aan maxkamadeed."

## Qaadashada lacagta laguu xukumo

Haddii dhibbanuhu guulaysto oo eedaysanuhu uusan bixin ama raaci waayo shuruudaha go'aanka maxkamadeed, dhibbanuhu wuxuu haddana uga yeeri karaa eedaysanaha maxkamadda si loo qabto "dhagaysiga eegista caddaymaha" si la iskula dejiyo qorshe lacag-bixin. Eedaysanayaasha sida badan waxa la waydiistaa inay keenaan dokumentiyada ku saabsan maalkooda. Dhagaysi eegista caddaymaha ah ayaa la muddayn karaa iyadoo ama:

La gaarsiinayo dhinaca kale Ogaysiiska Dhagaysiga Eegista Caddaymaha Sheegashooyinka Fudud (foom SC-004) – (karraanigu wuxuu kuu sheegi doonaa taariikhda la galinayo),

AMA

Haddaan la qorshaynayn in la gudbiyo in ka badan 3 eegista caddaymaha ah bishii, u dirista karraaniga Codsiga Dhagaysiga Eegista Caddaymaha Sheegashooyinka Fudud (foom SC-003) iyo Dhaarta qoran iyo Codsiga Gaarsiinta (foom SC-006). Karraanigu wuxuu u baahan yahay foomamkan si uu u qabanqaabiyo gaarsiinta eedaysanaha ogaysiiska dhagaysiga eegista caddaymaha.

## Rafcaan ka qaadashada kiiska

Dhinac kasta wuxuu rafcaan ka qaadan karaa go'aanka 30 maalmood gudahood marka go'aanku soo baxo isagoo gudbinayo Ogaysiiska Rafcaanka (foom SC-007). Waxaad ka heli kartaa foomkan karraani ama websaytka Laanta Caddaaladda.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan gudbinta ama ka jawaabista kiiska sheegashooyinka fudud, waydiiso karraaniga maxkamadda nuqul ah Hagaha Sheegashooyinka Fudud ama booqo: www.courts.maine.gov/help/small-claims

STATE OF MAINE JUDICIAL BRANCH



# Guudmar ah Maxkamadda Sheegashooyinka Fudud

www.courts.maine.gov

Maxkamadda Sheegashooyinka Fudud waa hab fudud, dhakhso badan, oo qiime jaban oo loo helo lacagta la xukumo ee ugu badnaan ah ilaa $6,000.

## Sida loo gudbiyo sheegasho fudud

Waxaad ka heli kartaa foomamka maxkamadda si aad u bilawdo kiis sheegashooyin fudud xafiiska karraaniga maxkamadda degmada ama websaytka Laanta Caddaaladda www.courts.maine.gov/forms.

Waxay ka kooban tahay afar tallaabo sheegashada fudud:

1. Buuxi foomka.
2. "Gaarsii" qofka kale.
3. U gudbi kiiska Maxkamadda Degmada.
4. Ka qaybgal dhagaysiga.

Tallaabada 1: Buuxi Bayaanka Sheegashada (foom SC-001). Waxaad tahay dhibbanaha, qofka aad dacwadda ka qabtaa waa eedaysanaha. Foomkan waxaad maxkamadda ugu sharrixi sababta qofka aad lacagta ku leedahay ay u tahay inuu bixiyo faahfaahin. Buuxi foomka inta ka dhiman oo saxeex.

Tallaabada 2: "Gaarsii" Bayaanka Sheegashada ee ku aaddan eedaysanaha. Tani waxay ka dhigan tahay hubinta in eedaysanuhu helo ogaysiiska kiiska iyo fursad uu ku jawaabo. Eeg qaybta "gaarsiinta", si aad u ogaato sida loo sameeyo arrintan. Caddaynta ah inaad gaarsiisay eedaysnaha waxa loo yaqaan "jawaabta gaarsiinta."

Tallaabada 3: U gudbi kiiska xafiiska karraaniga. 20 maalmood gudahood kadib markii eedaysanaha la gaarsiiyey (ogaysiiska), u gudbi maxkamadda Bayaanka Sheegashada iyo caddaynta gaarsiinta, iyo waliba $70 oo ah lacagta gudbinta.

Tallaabada 4: Ka Qaybgal Dhagaysiga. Karraanigu wuxuu u diri doonaa labada dhinacba Ogaysiiska taariikhda, wakhtiga, iyo goobta dhagaysiga. Dhagaysigu wuxuu noqon karaa fool ka fool ama Zoom (fogaan). Haddii aadan awoodin inaad ka soo qaybgasho taariikhda ogaysiiska ku qoran, u sheeg xafiiska karraaniga isla markiiba oo qoraal ku waydiiso in dhagaysiga muddadiisa wax laga beddelo. Karraanigu waxba kama beddeli karo wakhtiga dhagaysiga ee taleefanka ka qabsoomayso.

## Gaarsiinta

Gaarsiintu waa sida aad u siiso eedaysanaha ogaysiiska aad ku sheegayso inaad ka gudbinayso kiis. Jawaabta gaarsiintu waa caddayn maxkamadda loo gudbiyo oo tilmaamaysa in eedaysanaha farriintu gaartay. Gaarsiinta kiiska sheegashooyinka fudud waxay u dhacdaa dhawr qaab:

1. Iyadoo loo marayo U.S. Mail: Ugu horrayn waxaad u baahan doontaa foomka SC-005. Inaad u dirto nuqul Bayaanka Sheegashada ah, laba nuqul oo foomka SC-005 ah, iyo gal-waraaqeed cinwaanka lagu soo celinayo ku qoran yahay oo shaabadaysan eedaysanaha. Eedaysanuhu wuxuu u baahan yahay inuu saxeexo foomka SC-005 oo uu dib kuugu soo diro si aad maxkamadda ugu gudbiso. Haddii aad heli waydo qiraalka saxeexan 20 maalmood kadib, waxaad u baahan doontaa inaad ku gaarsiiso mid ka mid ah hababka hoose.

2. Markaad adeegsato U.S. Mail, Risiitka Soo Celinta la Codsaday. Risiitka saxeexan (foom cagaaran oo ka yimaad xafiiska boostada) ee adiga lagugu soo celiyo waa jawaabta gaarsiinta.

3. Gaarsiinta uu sameeyo Sheriff-ka. La xiriir xafiiska sheriff-ka degmadaada si aad u ogaato sida uu sheriff-ku u gaarsiiyey Bayaanka Sheegashada. Waxa waajib ah inaad lacagta gaarsiinta sheriff-ka sii qaddinto, laakiin waxaad codsan kartaa in lacagta xukunka kharashka lagu daro haddaad guulaysato. Sii sheriff-ka laba nuqul oo ah Bayaanka Sheegashada. Eedaysanuhu mid ayuu haysanayaa. Sherrif-ku wuxuu saxeexayaa oo kugu soo celinayaa ta kale si aad u gudbiso.

4. Gaarsiinta Xafiiska Karraanigu Sameeyo. Lacag $15 ah marka la bixiyo ayuu karraanigu isku-dayi karaa in eedaysanaha uu ku gaarsiiyo U.S. Mail. Haddii qiraalka helitaanka lagu heli waayo 20 maalmood gudahood, karraanigu wuxuu isku-dayi doonaa inuu waraaqaha kugu soo celiyo, waxaadna u baahan doontaa inaad gaarsiinta ku samayso mid ka mid ah saddexda hab ee sare lagu sharraxay.

5. Ku Gaarsiinta Qaabab Kale. Haddaad rabto inaad gaarsiinta ku samayso hab kale, waxa waajib ah inaad maxkamadda u gudbiso codsi aad ku rabto in laguu oggolaado inaad sidaas yeesho.

## Haddii lagu soo gaarsiiyey Bayaanka Sheegashada

Haddii lagu soo gaarsiiyey Bayaanka Sheegashada, dacwad ayaa kugu socoto. Waxaad tahay eedaysanaha kiiska.

Karraanigu wuxuu boostada ugu diri doonaa labada dhinacba Ogaysiiska Dhagaysiga oo sheegaya taariikhda, wakhtiga, iyo goobta dhagaysiga. Dhagaysigu wuxuu noqon karaa fool ka fool ama Zoom (fogaan). Haddii aadan awoodin inaad ka soo qaybgasho taariikhda ogaysiiska ku qoran, u sheeg xafiiska karraaniga isla markiiba oo qoraal ku waydiiso in dhagaysiga muddadiisa wax laga beddelo. Xafiiska karraanigu muddada dhagaysiga ee taleefanka waxba kama beddeli karo.

Hubi inaad tagto dhagaysiga! Diyaar u ahaw inaad u sheegto xaakinka wixii sabab ah ee ay tahay inaadan siin lacagta dhibbanaha. Haddii aadan ka qaybgalin, waxay u dhawdahay inaad kiiska ku waydo "lacag bixin waayid" oo lagugu yeesho lacagta la sheeganayo oo dhan.

Day-bixin. Waxa dhici karta inaad awooddo inaad xalliso kiiska adigoo la hadlaya dhibbanaha, kahor maalinta dhagaysiga ama maalinta dhagaysiga lafteeda. Kiisas badan waxa lagu xalliyaa dhexdhexaadinta maxkamadda (eeg qaybta "Dhexdhexaadinta"). Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa garyaqaanka ama bixiyaha adeegyada sharci si aad talo u hesho.